

## **Waxanu ilmahaaga cusub ee dhashay siinaynaa baaritaanka maqalka**

### **Sababta?**

Ujeedadu waa in xilli hore la helo Waxyeelooyinka maqalka si loo bixiyo taageero iyo caawimaad oo qaabkaas lagu suurto-geliyo horumar luqadeed oo fiican. Berigi hore waxa adkayd in la baaro maqalka caruurta yar. Haddii ilmo maqalkiisu xunyahay ma sahlana in la ogaado.

### **Goorma iyo halkee lagu sameeyaa baaritaanka maqalka?**

Baaritaanka maqalka waxa la fulin karaa dhowr maalmood ka dib ummulida. Haddiibaaritaanka maqalka aan lagu samayn xilliga joogitaanka isbitaalka umusha iyo dhalaanka ama ay tahay in dib loo sameeyo waxa ilmuhi uu ballan

ka helayaa isbitaalka hawenka ama Isbitaalka maqalka iyo dheellitirka, Isbitaalka jaamicadeed ee Karolinska ee ku yaal Huddinge ama Solna. Haddii aanaydin helin ballantabaaritaanka maqalka, la xiriir ugu horeyn Isbitaalka haweenka.

### **Sidee ayuu u dhacaa baaritaanku?**

Qaabka maaritaanka waxa lagu magacaabaa Soo Saarida Codka. Fur yar aya la saarayaa dhegta. Furkan wuxu ka koobanyahay laba dhuumood, dhawaaq-dire iyo maykarafoon. Diruhu wuxu diraa cod dhawaaq ah kaas oo kiciya dhegta unugyadeeda timaha si ay u dhaqaaqaan. Dhaqaaqyadan waxay noqdaan dhawaaq daciiif ah kaas oo uu soo qabto maykarafoonku. Marka ay jirto natijjo ansax ah waxa si weyn oo la hubo meesha looga saari karaa hoos u dhac maqalka ah oo micno u yeelanaya horumarka luqada. Imtixaanka maqalku waa mid dhakhso ah oo gebi ahaanba bilaa xanuun ah.

### **Haddii natijjadu noqoto sidi aananu doonayn?**

Tiro yar oo caruur ah ayay natijjadu noqotaa sidi aan la doonayn, laakiin intooda badan caruurtan waxay leeyihiin maqal caadi ah. Natijjada imtixaankan waxa raad ku yeelan karta haddii tusaael ahaan biyaha uurka ama duxda uurka ay ku hartay gudaha marinka maqalka. Hadiiba jawaabta imtixaanka la waayo markaasi dib ayaa loo sameeyaa. Dhinaca 1-2 ka mid ah 1000 caruurta cusub ee dhalata ayaa laga helaa dhaawac maqalka ah. Caruurtaasi waxa dib ula socod ku sameeya Isbitaalka maqalka iyo dheellitirka.

**Ka fikir** in dhibaato maqalka ahi ay soo bixi karto mar dambe oo ay uguna horeyso natijjado ka dhalatay xanuunka xuubka dhegta. Sidaas darteed waxa

muhiim ah in la foojignaado  
dhinaca maqalka ilmaha iyo  
horumarka luqada.

**Ma doonaysaan oggaanshaha wax  
dheeraad ah?**

Wixi warbixin dheeraad ah, gal  
bogga internet-ka ee Isbitaalka  
maqalka iyo dheellitirka

[www.karolinska.se/horsel](http://www.karolinska.se/horsel)



Baaritaanka maqalka ee caruurta cusub ee  
dhalatay waxa lagu sameeyaa halkan:

Isbitaalka umusha iyo caruurta ee Sophia  
Isbitaalka umusha iyo caruurta ee  
Stockholm  
Isbitaalka Danderyd  
Isbitaalka jaamicadeed ee Karolinska,  
Huddinge iyo  
Isbitaalka umusha iyo dhalaanka ee Södra  
Isbitaalka Södertälje

Karolinska Universitetssjukhuset Huddinge  
Telefon VX 08-585 800 00

Karolinska Universitetssjukhuset Solna  
Telefon VX 08-517 700 00



**Baaritaanka  
maqalka ee loogu  
talogalay caruurta  
cusub ee dhalatay**